

# Waxa la Fili karo kolka aad ugu Tago Is-Xaadirin Hay'dda ICE Minnesota

What to Expect When You Go to an ICE Check-in in Minnesota

Warqdan xogta aruursan waxa ay ka hadashaa waxa la sameeyo ka hor kulanka iska-xaadirinta Hay'adda Kastanka Mareykanka (U.S.) iyo Ilaalinta sharciyda laanta Socdaalka, ee siddoo kale loo yaqaan ICE. Siddoo waxa ay kuu sheegaysaa waxa la fili karo xilliga kulanka la iska xaadirinta hay'dda ICE.

Si aad u akhrido warqadan xoga aruursan ah oo Ingiriis ah ama Afaf kale ah, booqo: [lawhelpmn.org](lawhelpmn.org).

**Warqadan xogta aruursan ah waxaa sameeyey iskaashiyo dhexmaray hay'adaha Immigrant Law Center of Minnesota, Mid-Minnesota Legal Aid, Southern Minnesota Regional Legal Services, The Advocates for Human Rights, iyo the Volunteer Lawyers Network. Waxaana gargaaray maalgeliyey laga helay Waaxda Adeegyadda Bulshadda ee Gobolka Minnesota (State of Minnesota Department of Human Services).**

# Gundhigyada Iska Xaadirinta Hay'adda  ICE

## Waa maxay hay'adda ICE?

ICE waa magac kale oo ay leedahay Hay'adda Ilaalinta sharciyadda laanta Socdaalka iyo Kantanka ee Mareykanka (U.S.)   ICE waxa ay ka tirsan tahay Wasaaradda Ilaalinta Amniga Qaranka ee Mareykanka (Department of Homeland Security). Hay'adda ICE wxa ay mas'uul ka tahay ilaalinta sharciyadda laanta socdaalka ee wadaknka United States. Waxa aad ka heli kartaa akhbaar badan oo ku saabsan iyaga shabakadda (website) Wasaaradda Ilaalinta Amniga Qaranka (Department of Homeland Security).  Gal mareegta: https://portal.ice.gov/immigration-guide/check-ins

## Waa maxay waxa la yiraa iska xaadirinta hay'adda ICE?

Waa kulan lagula kulmo mas'uul ka tirsan hay'adda ICE xafiis hay'adda ICE ku leedahay deegaankaaga. Waxa lagu waydiin inaad xaqiijiso meesha aad ku nooshahay. Waxaa kaloo lagu waydiin doonaa wax ku saabsan kiiskaaga laanta socdaalka iyo wixii kiisas dambiyo ah ee aad ku lug leedahay.

## Ciddee ayaa laga rabaa inay tagto is-xaaddirinta hay'adda ICE?

Waa khasab inaad tagto iska xaadirinta hay'dda ICE markii aad ka hesho hay'adda ICE warqad ornaysa waa inaad u tagto si aad isaga xaadiriso. Waxaa jira sababo badan oo ay dhici karto inaad ugu baahato innad u tagto hay'dda ICE si aad isaga xaadiriso. Tusaalooyin ah sababaha ay tahay inaad ugu tagto hay'adda ICE si aad isaga xaadiriso waa:

- Inaad dhawaan timid wadanka United States.
- Inaad lagugu sii daayey curaar inta aad sugayso dhagaysiga dacwadaadda ugu horeeysa ee maxkamadda laanta socdaalka.
- In lagu amray in lagaa saaro wadanka Mareykanka (U.S.) xaakim laanta socdaalka ka ah laakiin, aadan wali haysan dukumiintiyadda aad u baahan tahay si aad u safarto.

Hay'ada ICE sidoo kale waxay ku waydiisan kartaa inaad ugu tagto is-xaadirin iyaga sababo kale.

## Siddee ayaan ku ogaan haddii aan leedahay is-xaadirin ICE?

Hay'adda ICE waxa ay kuu sheegi haddiii aad u baahan tahay inaad u tagto xafiiska ICE ee deegaankaaga is-xaadirin.  Hay'adda ICE waxa ay ku siin warqad oranaysa waa khasab inaad la kulanto hay'adda ICE. Waxay oran taariikhda, waqtiga, iyo goobta aad u baahan tahay inaad kula kulanto hay'adda ICE. Warqadda waxaa kaloo laga yaabaa inay leedahay sawirkaaga ama

uu ku qoran yahay lambarkaaga ajnabiga (A-Number) haddii aad haysato mid. Hay'adda ICE waxaa laga yaabaa inay kugu siiso warqadan:

- Boostadda. Waa khasab inaad hay'dda ICE u sheegto haddii aad guurto.
- Markii lagaa soo daayo hanta hay'adda ICE ama meel hoy ah.
- Marka ugu dambaysa oo aad is-xaadiriso. Marka aakhirka ah ee aad iska xaadiriso hay'adda ICE, waxa ay kuu sheegi marka xigta ee ay tahay inaad is-xaadiriso.

## Muddo intee le'eg ayey qaadataa iska-xaadirinta hay'adda ICE?

Waxa ay ku xiran tahay taasi xaaladda. Iska xaadirinta ICE  caadiyan waxa ay qaadataa 10 daqiiqo. Iska-xaadirin hay'adda ICE siddoo kale waxa ay qaadan kartaa dhowr saacadood haddii ay jiraan wax ku soo kordhay kiiskaaga ama xaaladaadda.

## Intee goor ayaa la iga rabaa inaan iska xaadiriyo hay'adda ICE bishii?

Waxa ay ku xiran tahay xaaladda. Qof walba jadwalkiisa iska xaadirinta hay'adda ICE waa u gaar. Hay'dda ICE ayaa go'aansata inta goor ee aad u baahan inaad u tagto oo aad iska xaadiriso. Tusaale ahaan, waxa ay noqon kartaa 1 mar 3 dii biloodba. Waxa ay noqon kartaa 1 mar 6 ii biloodba. Waxa ay noqon kartaa 1 mar sannadkiiba. Aakhirka iska-xaadirinta ICE ayey laguu sheegi marka aad u baahan tahay inaad soo noqoto.

## Ma bedeli karaa goobta iska xaadirinta hay'adda ICE?

Haa. Waxa aad waysiin kartaa hay'adda ICE inay bedesho xafiiska deegaanka hay'adda ICE ee aad u tagto is-xaadirintaadda haddii aad u guurto magaalo ama gobol kale.



**Tusaale ahaan: Ana waxay u guurtay gobol cusub.**

Ana waxay ka soo gashay Mareykanka (U.S.) Arizona. Waxa ay heshay warqad oronaysa iska-xaadirinteeda hay'adda ICE waxaa looga qabtay xafiis hay'adda ICE ay ku leedahay Arizona. Ana waxa ay u soo guurtay Minnesota si ay ula noolaato eedadeed. Waxa ay rabtaa inay u soo wareejiso iska-xaadirinteeda hay'adda ICE xafiis ay hay'adda ICE ku leedahay Minnesota.

## Siddee ayaan u waydiistaa inaad wareejiyo goobta iska xaadirinta ICE?

Waa khasab inaad sameyso labo waxyaabood:

1. **U sheeg hay'adda ICE inaad guurtay**. Gal shabakadda (website) ICE ka dibna buuxi foomka bedelidda ciwaanka: https://portal.ice.gov/ocoa

2. **Wac xafiiska hay'adda ICE ee deegaankaaga ee ku qoran warqadaadda. Waydiiso in loo wareejiyo is-xaadirinta xafiis ku yaal meesha aad hadda ku nooshahay.**

## Maxaa dhici haddii aanan tagin balantayda iska xaadirinta hay'adda ICE?

Hay'adda ICE waxa ay kugu heli kartaa "fulin la'aan' waxa la yiraa. Taa macnaheedu waa hay'dda ICE waa:

- Ay ku soo dooni kartaa adiga.
- Kaala noqon karaa curaarta lagugu sii daayey haddii aad mid haysato.
- Ku xiri kartaa.

## Ma la igu qaban karaa goobta iska xaadirinta hay'adda ICE?

Haa. Xukuumadahu waxa ay leeyihiin xeerar kala duwan. Oo ku saabsan kolka ay tahay in la qabto dadka. Waxaa jira dhici karta in lagugu qabto goobaha iska xaadirinta hay'ada ICE. Laakiin, waa inaa tagtaa is-xaadirintaadda. U diyaari qoyskaaga qaadna talaabooyin ka hor inta aadan tagin si aad diyaar u ahaato lacala haddii lagu qabto.

## Waa maxay sababta ay tahay inaan ula hadlayo qareen?

La hadal qareen laanta socdaalka (immigration) sharciyadeeda yaqaan ka hor inta aadan aadin iska-xaarin hay'adda ICE haddii:

- Lagu xiray sababtu wax kasta ha noqotee ilaa iyo intii ka dambaysay markii aad iska-xaadirisay hay'adda ICE.
- Aad ku jirto "amar kormerid ah." Taa macnaheedu waa xaakim ayaa amray in lagaa saaro wadanka United States, laakiin laguguma celin karo wadankaaga waayo waxaa dhici karta in lagugu jir-dilo ama wax lagugu yeelo halkaa. Tani waxa ay noqon kartaa saa haddii laguu ansaxiyey 'ka deyn saarid" ama ilaalin sidda uu dhigayo Heshiiska ka Dhanka ah Jir-dilka "CAT".

# Waxa la Sameeyo Ka Hor Iska Xaadirintaada Hay'ada ICE

## Waa xaggee meesha aan iska xaadirinayaa?

Iska xaadirinta ICE waa mid la tago goobta. Waxa ayna ka dhacaan xafiiska deegaanka ee hay'adda ICE. Minnesota, xafiiska deegaanka ee hay'adda ICE waxa uu ku yaal iska dhismaha ay ku taal maxkamadda dacwo qaadida ee laanta socdaalka (immigration). Raac talaabooyinka "Waxa la fili karo inaad la kulmo kolka aad tagto iska xaadirinta hay'adda ICE, ee qaybta warqadan xogta aruursan ah.

## Maxaan soo qaataa?

Waa inaad soo qaadato dukumiintiyo cadeynaya cidda aad tahay, meesha aad ku nooshahay xaaladda uu marayo kiiskaaga laanta socdaalku. Isticmaal liiska ku jira warqadan xogta aruursan ah si aad u hubiso inaad soo qaadato wax walba oo aad u baahan tahay.

**Dukumiintiyadda oo dhan waa inay yihiin afka Ingiriiska. Ha kuu turjunto ciddi wixii dukumiinti muhiim ah oo aan afka Ingiriiska ah.** Haddii dukumiintiyadda asalkoodu uusan af-Ingiriis ah, waa khasab in ciddi turjuntaa. Ka hel foomka turjumaha oo banaan mareegta: :lawhelpmn.org/sites/default/files/2025-02/Immigration Certificate of Translation.pdf

Hay'adda ICE siddoo kale waxa ay u baahan tahay inay ogaato in lagu xiray, lagugu soo eedeeyey dambi ama lagugu helay dambi. Waa khasab inaad u sheegto wixii xiritaan ah ee cusub. Siddoo kale waa khasab inaad u sheegto haddii wax iska bedelaan kiis dambi ah oo kugu furnaa. Barta LawHelpMN waxa ay haysaa warqad xog aruursan ah oo oranaysa sidda ay dambi ku eedayntu u saameyn karto sharcigaagga. Gal mareegta: lawhelpmn.org/self-help-library/fact-sheet/how-being-charged-crime-can-affect-your-immigration-status. Ula tasho qareen yaqaan sharciyadda laanta socdaalka sidda si ugu dakhsaha badan haddii lagu xiro ama lagugu soo eedeeyo dambi. Waxa uu kaa caawin karaa inaad fahamto sidda dambi ku soo oogida ama dambi ku heliddu ay u saameyn doonto kiiskaaga laanta socdaalka. Barta LawHelpMN waxa ay haysaa liis qareemo ay dhici karto inay ku caawiyaan. Gal mareegta: lawhelpmn.org/providers-and-clinics.

## Ciddee soo wadan karaa?

Uma baahnid inaad cid soo wadato. Waxa aan dooran kartaa inaad soo wadato:

- Qareen ama taakuleeye haddii aad mid haysato.
- Saaxiib ama ehel ku gargaara.
- Qof kuu turjuma. Hay'adda ICE kuuma keenayso turjubaan. La imow qof kuu turjuma haddii Ingiriis kaagu uusan fiicnayn.

Ilmahaaga guriga uga soo tag haddii aad awoodo. Haddii aad u baahato inaad soo kaxaysato, soo kaxayso qof kuu sii haya inta aad is-xaadirinayso. Sarkaaliisha hay'adda ICE waxa ay joogaan iska dhismahaa aad tagayso. **Hubi in qof walba oo aad soo kaxaysanaysaa uu ugu nool yahay wadanka United States si sharci ah (qof haysta sharci ah).**

## Ma jiraan wax kale oo aan u baahnahay inaan sameyo ka hor inta aanan tagin goobta?

**Waxaa jirta mar walba khatar ah in hay'adda ICE ay ku qabato xilliga is-xaadirinta.** Samee labo waxyaabood:

- U sheeg qof aad aaminsan tahay waqtiga iyo goobta iska-xaadirinta hay'adda ICE. Qofkaasi waa inuu ogaadaa inaad halkaa joogto. U sheeg qofka marka aad ka soo noqoto iska-xaadirinta hay'dda ICE oo guriga timaado iyana.


- Diyaari qoyskaaga, qaadna talaabooyin ka hor inta aadan tagin goobta lacala haddii lagu qabto. Barta LawHelpMN waxaa ku jira xog aruursan oo kaa caawin karta inaad diyaar ahaato lacala haddii lagu qabto.

# Waxa la Fili karo inaad la Kulanto iska Xaadirintaada ICE

## Waqti intee le'eg ayaan soo hormaraa?

Tag deegaanka ee hay'adda ICE 30-daqiiqo ilaa iyo 1-saac ka hor waqtiga is-xaadirinta. Ku talagal inaad maxkamadda joogayso 4-saac. Dhagaysiga dacwadaadda waxaa dhici karta inay noqdo 15-daqiiqo uun. Laakiin waxaa dhici karta inaad sugto muddo dheer inta uu ka bilaabmayo.

## Siddee ayaan ku tagaa deegaanka ee hay'adda ICE?




Mari kooda QR ka si aad uga hesho tilmaamo Khariidada Google.

## St. Paul ICE Field Office (Deegaanka ee hay'adda ICE)



1 Federal Drive, Suite 1601
Fort Snelling, MN 55111
Phone number: (612) 843-8600
*Xafiiska deegaanka ee hay'adda ICE wuxuu ku yaal iska dhismaha ay ku taal maxkamada laanta socdaalka. Xafiiska deegaanka ee hay'adda ICE waa qol kale oo ka duwan kana maxkamadda.

## Barxada (Parking)

Waxaa jira meelo gawaarida la dhigto (parking) oo bilaash ah oo maxkamadda horteeda ku yaal. Sii mar saldhiga ilaaladda si aad u gaarto barxadda. Tus aqoonsigaaga (ID). Waxaa kaloo jira barxaddo kale oo u dhow Fort Snelling Station N.

## Tareenka

ICE field office-waxa ay u dhowdahay goobta **Fort Snelling Station N.** Joogsigan waxa ay ku taal goobta Twin Cities Metro Transit Blue Line. Booqo barta: [metrotransit.org](metrotransit.org) si aad u ogaato jidka ugu fiican.

# Xaggee ayaan ka tagaa maxkamadda gudaheeda?

### Talaabadda 1: Sii mar ilaaladda.

Waxaa arki ilaalo meesha joogta kolkaa aad soo gasho maxkamadda. Waxa aad u baahan tahay:




**Inaad iska bixiso kabaha iyo suunkaagaba. Jeebabkaana mari. Geli wax walba oo aad wadatay mashiinka (x-ray).** Kuwaa waxaa ku jira talefanka gacanta, boorsadda, boorsada garabka. Ka soo saar kumbuyuutarada, looxadaha, iyo aaladaha korontadda ku shaqeeya boorsadaada. Ku rid weel gaar ah. Ha u soo qaadan wax hub ah maxkamadda. Ha soo qaadan, barafuunka, cadar ama ur bi'iyaha la isku buufiyo.



**Dhex mar bir sheegaha.** Haddii uu bir sheegahu uu qayliyo, ilaalada ayaa ku waydiin inaad lugahaaga iyo gacmahaaga aad kala fogeyso. Ul bir ah ayey jirkaaga oo dhan korka ka marin si ay u helaan birta qalabku sheegay. Bir sheegaha waxaa laga yaabaa inuu u qayliyey dahab aad gashan tahay awgii.

### Talaabadda 2: Tag qolka # 1601




Si aad u tagto qolka # 1601 adigoo maraya dhanka ilaaladda:

- Ka dib ilaaladda, **toos u bax,** dhaaf wiishashka.
- Qolka is-xaadirinta ee hay'adda ICE waxa uu kaa qaban bidixda. Waana qolka lambarkiisu yahay # 1601.

## Maxaa dhaca marka la is xaadirinayo?

### Talaabadda 1: U tag qofka fadhiya daaqadda



Gudaha qolka 1601, waxaa ku jira qof daaqadda fadhiya. Gal laynka si aad ula hadasho qofkaa. Waxaa dhici karta inaad sugto qofka 30 daqiiqo ama ka badan.

### Talaabadda 2: Qofka daaqadda fadhiyaa waxa uu ku waydiin doonaa su'aalo.



Qokaa waxaa laga yaabaa inuu ku hadlo aflka Isbaanishka ama uusan ku hadlin. Uga jawaab su'aalaha oo dhan si daacad ah. Qofku waxa uu ku waydiin doonaa adiga:

- **"Ma arki karaa jadwalkaaga is keenida?"** Taasi waa warqad ay hay'adda ICE ku siisay oo leh waqtiga iyo goobta iska-xaadirinta hay'adda ICE.

- **"Wali ma ku nooshahay ciwaankan?"** Haddii aad guurtay, waxa aad u baahan tahay inaad siiso dukumiinti cadeeya meesha aad ku nooshahay hadda.
- **"Waa maxay lambarka telefankaagu?"**
- **"Waa goorma qaadida dacwadaadda soo socotaa?"**
- **"Ma leedahay wax codsiyo ah oo kaaga xaraysan laanta socdaalka (immigration)?"** U sheeg hay'adda ICE wixii codsiyo ah oo soo gudbisatay oo ay ku jiraan magangelo ama warqad shaqo.

## Talaabadda 3: Qof daaqadda fadhiyaa ayaa kaa baari kumbuyuutarka hay'adda ICE.



**Haddii ay jiraan su'aalo kale oo ku jira galkaaga, qofka daaqadda fadhiyaa waxaa dhici karta inuu ku geeyo qol gaar ah.** Eeg talaabadda 4.

**Haddii aysan ku jirin wax su'aalo ah oo kale galkaaga, is-xaadirintii kolkaa waa dhamaatay.** Qofka daaqa fadhiyaana waxa uu kuu sheegi:

- Inaad bixi karto.
- Taariikhda iyo waqtiga marka xigta ee aaad is-xaadirinayso.
- Haddii aad u baahan tahay inaad gasho Barnaamijika Imaashaha ee Kormeerida Adag (ISAP). ISAP waxa ay la leedahay qandaraas hay'adda ICE si ay u sameyso kormeer badan. ISAP waxa ay ku waydiin inaad telefan isku xaadiriso ama lugta bir lagaaga xiro. ISAP waxay kaloo kugu soo booqan kartaa guriga ama shaqada.

## Talaabadda 4: Waxaa dhici karta in qol gaar ah lagu geeyo. Uuna sarkaal ICE ka tirsan su'aalo badan ku waydiiyo.



Waxa aad sugi kartaa 30 daqiiqo ama 1 saac ka hor inta uu diyaar kuu noqonayo sarkaalka hay'adda ICE. Su'aalahu siddoo kale waxa ay qaadan karaan 1 saac. Waxaa jira sababo badan oo aad ugu baahan karto inaad sii joogto aadna ka jawaabto su'aalo. Taasi waxay noqon kartaa sabab ah:

- Waxaa laguu qabtay balan waqti dheer.

- Waxa aad haysataa dukumiintiyo u baahan in la geeyo goobta.
- Dambi cusub awgii ayaa laguu xiray ka dib iska-xaadirintii haya'dda ICE ee ugu dambaysay.
- Wax ayaa iska bedelay fulinta sharciyadda laanta socdaalka (immgration).

## Ma waydiin karaa sarkaalka hay'adda ICE su'aalo ku saabsan kiiskayga laanta socdaalka (immigration)?

Maya. Ha waydiin qofka daaqadda fadhiga ama sarkaal hay'adda ICE ka tirsan su'aalo ku saabsan qaadida dacwadaadda ama kiiskaaga laanta socdaalka. Ha waydiin cid joogta xafiiska hay'adda ICE talo ku saabsan kiiskaaga laanta socdaalka (immigration).

## Ka waran haddii aanan ku kalsoonayn inaan si fiican u isticmaali karo afka-Ingiriiska?

Hay'dda ICE uma keento dadka turjubaan xilliga is-xaadirinta. Soo kaxayso qof kuu turjuma adigu, haddii aadan ku kalsoonayn inaad si fiican u isticmaali karto afka Ingiriiska.

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**

# TAXAALKA:
# Dukumiintiyada lala yimaado is-xaadirinta ICE

*Cadeyn Balantaadda Is-xaadirinta ah*

☐ **Warqdo boostadda aad ku heshay ama lagu siiyey markii kuugu dambay is-xaadirinta ee oranaysa waa inaad la kulanto hay'adda ICE.** Waxa ku qoran taariikhda iyo goobta aad u baahan tahay inaad kula kulanto hay'adda ICE.

*Cadeyn ah Cidda aad tahay*

☐ Tani waxa ay noqon kartaa Aqoonsi (ID) dal-ku-gal (passport) ama dukumiintiyo kale oo lagu safro.

*Cadeyn ah Meesha aad ku Nooshahay (haddii Aad Guurtay)*

☐ Tani waxa ay noqon kartaa kharash koronto, heshiiska guri degida (lease), cadeyn shaqo, ama warqaddo kuugu soo dhacay ciwaankan.

*Wixii dukumiinti ah Ee aad haysato ee ku saabsan kiiskaaga laanta socdaalka (immigration)*

☐ Kuwaasi waxay noqon karaan:

- **Warqad ka timi maxkamad laanta socdaalka (immigration)** oo oronaysa waxaa aad leedahay maxkamad "Ogaysiis Maxmakad Hor tagid ah."
- **Warqad oronaysa in USCIS ay heshay codsigaaga barnaamijyadda nasteexeynta ah sidda magangelyadda, martabadda ilaalinta ku meelgaarka (TPS) ama sharci deganaasho (green card).** Warqaddu waxay oran hay'adda USCIS waxa ay dib u eegaysaa codsigaaga.
- **Warqad ka timaada qareenkaaga oo oronaysa xaalka uu marayo kiiskaagu.**

*Akhbaar ku saabsan wixii dambiyo ah ee lagugu soo eedeeyo.*

☐ Taas waxay noqon kartaa:

- Dukumiintiyo muujinaya in lagu xiray sababtu si kastaba ha noqotee.
- Dukumiintiyo muujinaya in dambiyo lagugu soo oogay lagaa cafiyey.
- Dukumiintiyo muujinaya in wax iska bedeleen kiiskii ee lagugu haystay.

*Cadeyn ah Sababta Xiritaankaagu uu u yahay Qaxar aad u Weyn*

☐ Taasi waxau noqon kartaa:

- Qoraalo caafimaad oo ka hadlaya qof ehel ah o xanuunsan oo aad hayso.
- Warqad dhalasho oo caruur Mareykan (U.S.) ah haddii aad tahay qofka kaliya ee haya iyaga